



War-Murtiyeed

Shirweynaha Wada-tashiga Beesha Murusade

BISMILLAHI RAXMAANI RAXIIM,

Waxaa si guul ah kusoo dhamaaday qabsoomidda Shirweynaha Wada-tashiga Beesha Murusade oo hal-kudhigiisu ahaa **'Wadajirkaa, Jiriteenkeenu ku Jiraa'** kaas oo ka socday magaalada Muqdisho inti u dhexeysay 6-9ka Maarso 2023.

Shirweynaha Beesha Murusade wuxuu si gaar ah ugu mahadcelinayaa Ugaaska Beesha Murusade, Ugaas Cabdullaahi Ugaas Xaashi Ugaas Faracadde oo ah Ugaaska Beesha Murusade ee Shirweynaha furay, uguna duceeyay Beesha in Alle barakeeyo, towfiiqdana waafajiyo soona xiray Shirweynaha Wada-tashiga Beesha Murusade.

Shirweynuhu wuxuu sidoo kale, u mahadcelinya dowlada shariifka ah ee dhaqanka Beesha Murusade ka qaatay suurta-gelinta qabsoomidda Shirweynaha Wada-tashiga Beesha Murusade.

Shirweynuhu wuxuu u mahadcelinayaa dhammaan siyaasiyiinta Beesha Murusade ay kamid yihiin Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad Goboleedka Galmudug, Dr. Maxamed Nuur Galal, Xildhibaanada Golaha Shacabka, Xildhibaanada iyo wasiirrada heer dowlad goboleed, iyo dhammaan siyaasiyiinta sharafta leh ee beesha Murusade.

Shirweynuhu wuxuu bogaadinayaa kasoo qayb galka dhammaan qeybaha kala duwan ee bulshada ku abtirsata Beesha Murusade oo ka kala yimid Gobolada dalka iyo dibeddiisaba si ay kaalintooda uga qaataan Shirweynaha.

Shirweynuhu wuxuu u mahadcelinayaa Qurbajoogta Beesha Murusade kaalinta mugga leh ay ka qaateen abaabulka iyo qabsoomidda Shirka Wada-tashiga Beesha Murusade walina ay wadaan horumarinta arrimaha beesha.

Shirweynuhu wuxuu u mahadcelinayaa Guddiga Qaban-qaabada Shirweynaha Wada-tashiga Beesha Murusade sida uu u agaasimaya geedi-socodka shirka, sugidda amniga iyo xaqiijinta in shirka ay kasoo baxaan natiijooyin waxku ool ah.

Shirweynaha ka socday muddada afarta maalmood ah magaalada Muqdisho, waxaa kasoo baxay qodobada hoos ku qoran:

Ujeedooyinka Shirweynaha Wada-tashiga Beesaha Murusade:

1. In Beesha Murusade ay aayaheeda uga tashato shirweyne ay qeyb ka yihiin wax garadkeeda.
2. In la sameeyo xog-ururin iyo falanqayn la xiriirta xalaadda guud ee Dalka gaar ahaan Degaannada ay Beeshu Degto.
3. In qeyabaha kala duwan ee beesha Murusade ay ka tashadaan sidii loo laba-llaabi lahaa dagaalka lagula jiro Al-Shabaab si looga saaro degaanada ay Beeshu ka degto Dalka.
4. In dib loo qiimeeyo lana xoojiyo dowlad ay beesha Murusade ku leedahay geedi socodka dowlad dhiska Soomaaliya.
5. In Shirweynuhu iska waraysato saamaynta togan ama taban ee geedi-socodka federaalynta dalka ku yeelatay Beesha Murade.
6. In Shirweynuhu abuurto jawi xasiloon oo lagu hormarinayo danaha masiiriga ah ee Beesha Murusade.

Go'aannada Shirweynaha Wada-tashiga Beesha Murusade

1. Shirweynaha Beesha Murusade wuxuu si weyn u bogaadinayaa Dowladda Federaalka Soomaaliya oo uu hoggaaminayo Madaxweynaha JFS, Dr. Xasan Sheekh Maxamuud, Ra'iisul Wasaaraha JFS Mudane Xamse Cabdi Barre iyo Golahiisa Wasiirrada dadaallada istiraatiijiga ah ay ku bixinayaan la-dagaalanka iyo ciribtirka argagaxisada manaxayaasha ah ee dadka iyo dalka Soomaaliyeen muddo 15 sanadood ah dhibaatooyin aan lasoo koobi karin ku hayay.
2. Hoggaanka Dhaqanka Beesha Murusade ee uu ugu horeeyo Ugaas Cabdullaahi Ugaas Xaashi Ugaas Faracadde, culimada, ganacsatada, haweenka, dhallinyarada waxgaradka iyo siyaasiyiinta waxay si mug leh u taageerayaan Ciidamaka Qalabka-sida iyo ciidamada dib-u-xoraynta ee kasoo jeeda degaanada ay argagaxisado ka talinaysay muddo fog.
3. Shirweynaha Beesha Murusade wuxuu isla qaadatay in si nabdoon oo shuruud la'aan ah beeshu dowladkeeda uga qaadato geedi-socodka dowlad dhiska Soomaaliya.
4. Shirweynaha Beesha Murusade wuxuu go'aamiyay in si dhow beelaha Soomaaliyeed uga wada sheeqeeyaan ciribtirka Khawaarijta iyo ilaalinta hannaanka awood qeybsiga hay'adaha dowladda.
5. Shirweynuhu wuxuu go'aamiyay in si degdeg ah Khawaarijta looga xoreeyo degaanadda ay beeshu ka degto Galmudug.
6. Shirweynuhu wuxuu bogaadinayaa xiriirka soo jireenka ah ee Beesha Murusade kala dhexeeya beelaha ay wada degaan iyo kuwa kale ee Soomaaliyeed.
7. Shirweynuhu wuxuu si gaar ah u bogaadinayaa xiriirka soo jireenka ah ee kala dhexeeya Beesha Digil iyo Mirifle ee Koonfur Galbeed, wuxuuna go'aamiyay in si degdeg ah gogol loo dhigo ay labada beelood uga wada hadlaan xoojinta xiriirkooda.
8. Shirweynuhu wuxuu garowsaday tabashada Beelaha Digil iyo Mirifle ay u jeediyeen Dowladda Federaalka Soomaaliya.

9. Shirweynuhu wuxuu Dowladda Federaalka Soomaaliya ka dalbanayaa in xilka Duqa Magaalada Mudsho iyo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir la kala qaado inta Maqaamka Caasimadda go'aan looga gaarayo dib-u-eegista dastuurka ayna beeshu xaq u leedahay mid kamida.
10. Shirweynuhu wuxuu go'aamiyay in la sameeyo guddi toban iyo seddax qofood ah oo ka sheeqeeya horumarrinta arrimaha beesha iyo adkaynta wadajirka Beesha Murusade.
11. Shirweynaha Beesha Murusade wuxuu go'aamiyay in Shirweynaha Wada-tashiga Beesha Murusade la qabto sanad kasta mar bisha Maarso si ay uga tashato arrimaheeda masiiriga ah oo ay garab socdaan shirar qiimeyn ah oo dhaca seddedi biloodba mar.

Baaqa Shirka Wada-tashiga Beesha Murusade

1. Bisha barakaysan ee Ramadaan oo bilaabanaysa awgeed, Shirweynuhu wuxuu Umadda Soomaaliyeed ugu baaqayaa in ay is-cafiyaan, isu-naxariistaan, nabad kuwada noolaadaan, isu-dulqaataan, isku-meelna uga soo jeestaan cadowgooda.
2. Shirweynuhu wuxuu ugu baaqayaa Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedka Galmudug in ay ahmiyad gaar ah siiyaan dib-u-xoraynta degaanadda ay beeshu ka degto Galmudug.
3. Shirweynuhu wuxuu ugu baaqayaa qeybaha kala duwan ee beesha, qurbajoogta, ganacsatada, culimaa'udiinka iyo dhallinyarada inay ka qeyb-qaataan gurmada dadka ku dhibaataysan degaanada beeshu ay degto oo ay ka jiraan abaaro daba-dheeraaday.
4. Shirweynaha Beesha Murusade wuxuu hoggaanka Dowladda Federaalka Soomaaliya ugu baaqayaa in ay ka cadaalad falaan xukunka dalka, ilaaliyaan wadajirka umadda iyo sareynta sharciga.
5. Shirweynuhu wuxuu ku baaqayaa in si degdeg ah Dowladda Federaalka Soomaaliya, Dowlad Goboleedka Galmudug iyo saaxibada caalamka adeegyada bulshada (mashaariicda xasilinta) u gaarsiiyaan degaannada Beeshu degto Galmudug kadib marka laga xoreeyo argagixisada oo in muddo ah gacanta Dowladda ka maqnaa.
6. Shirweynaha Beesha Murusade wuxuu ku baaqayaa in shirweyne ay ku dhanyihiin loo qabto Beelaha Karanle (Gidir, Siixawle, Kaariye iyo Murusade) ee kala dega Soomaaliya, Ethiopia iyo Kenya.

Waxaan Allaah Weydiisanaynaa in uu Ummadda Soomaaliyeed siiyo Nabad Waarta iyo Nolol wanaagsan.

Dhamaad